

4. Tirinta Codadka

- Codadka sida hordhaca ah loo bixiyay waxaa la tirinayaa maalinka doorashada, natiijada codadka hordhaca ah waxaa lagu dhawaaqayaa marka goobaha codbixintu xirmaan saacadda 20:00 fiidnimo.
- Codadka la dhiibay maalinka doorashada waxaa la tirinayaa marka codbixintu dhammaato. Degmooyinku waxay natiijada u gudbiyaan guddiyada doorashada, natiijada hordhaca ahna waxaa lagu dhawaaqayaa fiidnimada maalinka doorashada.
- Natiijada rasmiga ah ee doorashada waxaa la ansixinayaa marka dhammaan codadka si rasmi ah loo hubiyo.



URUR DEGMEEDKA SOOSHAL
DIMOQRAADIGA EE ESPOO

espoondemarit.fi

WAXAA QORAALKAAN WARBIXINTA
DOORASHOYINKA MAALGELIYAY

KULUTTAJA-
OSUUSTOIMINNAN  SÄÄTIÖ

ESITTEEN KIELI: SOMALI

CODEYNTA DOORASHOYINKA

Codbixiyayaashu waa ay siman yihiin,
cod kastaana waa muhiim.



1. Xaquuqda Codeynta

Dhammaan dadka da'doodu tahay 18 sano jir iyo wixii ka weyn ayaa xaq u leh inay codeeyaan. Doorashooyinka golaha degmooyinka iyo gobollada, waxaa codayn kara muwaadiniinta u dhalatay dalalka Midowga Yurub ee ku nool Finland iyo dadka ajaanibta ah ee Finland ku noolaa ugu yaraan muddo laba sano ah.



Doorashooyinka baarlamaanka iyo madaxweynaha, waa in qofka codka bixiinaaya uu haysto dhalashada Finland. Doorashooyinka Baarlamaanka Yurub, xuquuqda codbixintu waxay ku xaddidan tahay hal dal oo keliya, iyadoo lagu salaynaayo dhalashada ama dalka uu qofku deggan yahay.

sabti	AXAD MAALINKA DOORASHADA 18 sano	isniin
-------	---	--------

WARGELINTA XUQUUQDA CODEYNTA

Doorashada ka hor, qof kasta oo xaq u leh codeynta waxaa gurigiisa loogu soo dirayaa warqad ogeysiin ama wargelin ah oo loogu sheegaayo xuquuqdiisa codeynta. Warqaddaas waxay sidoo kale tilmaamaysaa goobta codbixinta ee uu qofku uu ka codayn karo maalinta doorashada.



2. Codeynta

Codayntu waxay ka dhacdaa goobta codbixinta ee doorashada ama goobaha doorashada ee codbixinta hore, iyadoo la adeegsanaayo kaarka ama warqadda codeynta (äänestyslippu). Finland weli lagama isticmaalo nidaamka codbixinta elegtorooniga ah.

CODEYNTA HORDHACA AH (ENNAKKOÄÄNESTYS)

Codeynta hordhaca ah waxay ka dhacdaa gudaha iyo dibadda Finland toddobaadka ka horreeya doorashada. Qofku wuxuu ka codeyn karaa goob kasta oo ka mid ah goobaha codeynta hordhaca ah ee gudaha Finland, ama safaaradaha iyo qunsuliyadaha Finland ee dibadda.

ENNAKKOÄÄNESTYSPAIKKA
FÖRHANDSRÖSTNINGSTÄLLE

CODEYNTA MAALINKA DOORASHADA (VAALIPÄIVÄN ÄÄNEESTYS)

Maalinka doorashada rasmiga ah waa Axad, Maalintan, qofku wuxuu codkiisa ka dhiiban karaa oo keliya goobta codbixinta ee ku xusan warqadda wargelinta ee guriga loogu soo diray, taasoo ku saleysan cinwaanka rasmiga ah ee uu deggan yahay.

Warqadda guriga lagu soo diray waxaa ku qoran liiska goobaha codbixinta hordhaca ah iyo goobaha codbixinta ee maalinka doorashada. Goobaha codbixintu waxay furan yihiin maalinka doorashada laga bilaabo 9:00 subaxnimo ilaa 20:00 fiidnimo.




XX äänestysalue
röstningsområdet




3. Goobta Codbixinta

Codbixiyuhu waa inuu hore u soo qaataa aqoonsigiisa shakhsiyadeed, tusaale ahaan baasaboora, kaarka aqoonsiga ama rukhsadda gaari wadista (leveysinka) ama aqoonsi kummeelgaar ah, si uu u tuso shaqaalaha jooga goobta doorashada.



Codbixiyuhu waxaa uu helayaa kaarka codeynta, kaasoo uu ku buuxiinaayo qolka codeynta dhexdiisa, isagoo keliigiis ah – Finland waxaa ka jira waxa loo yaqaan ilaalinta sirta doorashada. Lambarrada musharrixiinta waxaa ay ku qoran yihiin liiska magacyada musharrixiinta ee ku dhagan gudaha qolka codeynta. Codbixiyuhu wuxuu si cad oo muuqata ugu qorayaa kaarka codeynta, lambarka musharraxa uu dooranaayo. Lama oggola in wax calaamado kale ah lagu qoro kaarka codeynta.



Marka lambarka lagu qoro kaarka codeynta, kaarka waa la isku laabayaa, waxaana loo geeynayaa qof ka mid ah shaqaalaha doorashada, kaasoo shaabbadaynaaya kaarka codeynta.



Intaas kaddib, codbixiyuhu wuxuu warqadda codka ku ridayaa sanduuqa codbixinta.